

Ma wadaa mooto?

Qawaaniinta cusub laga bilaabo bisha oktoobar 1, 2009

Si kor loogu qaado ammaanka gaadiidka iyo dadka, waxaa isbedelaya qawaaniinta waditaanka mootada dabaqa 1aad iyo dabaqa 2aad laga bilaabo kowda oktoobar 2009. dhalabka cusub ee kartida waditaanka gaadiidka AM –ayaa la dabaqayaa kaa ayaana ah dalabka qofka raba inuu bilaabo inuu wado mootada dabaqa 1aad. Islamarkaana waxey taasi lama huraan u noqoneysaa in la helo shahaadada caddeynta waditaanka si qofku u bilaabo waditaanka mootada dabaqa 1aad.

Warqadda wadista gaadiidka ee mootada dabaqa 1aad

Dalabka cusub ee warqadda wadista gaadiidka AM waxey xaq kuu siineysaa inaad waddo mootada dabaqa 1aad iyo mootada dabaqa 2aad iyadoo ay weheliyaan cagafcagafyada iyo noocyo ka mid ah qalabka matoorada (mishiinada).

Si aad u qaadato warqadda wadista gaadiidka ee AM, waxaad u baahantahay inaad:

- Heysato warqadda ogolaanshaha imtixaanka wadista gaadiidka oo ansax ah.
- Da'daada buuxisay 15 sanno ama in ka badan.
- Ka soo dhameysay waxbarashada tababare xirfad u leh waxbarista.
- Aad ku gudubtay imtixaanka aqoonta ee aragtida waditaanka (teoriproov) ee ka dhaca hey'adda wadooyinka qaranka (Vägverket).

Warqadda wadista gaadiidka mootada (AM) waa warqad dhab ah oo loo isticmaali karo sida kaarka aqoonsiga (ID-kort).

Warqadda caddeynta wadista gaadiidka mootada dabaqa 1aad

Waxey xaq kuu ansaxineysaa inaad waddo mootada dabaqa II. Si aad u qaadato warqadda caddeynta wadista mootada dabaqa 1aad waxaad u baahantahay in:

- Da'daada buuxisay 15 sanno ama in ka badan.
- Ka soo dhameysay waxbarashada tababare xirfad u leh waxbarista.
- Aad ku gudubtay imtixaanka aqoonta ee aragtida waditaanka ee uu sameeyey imtixaan qaade khibrad u leh imtixaanada.

Mootada dabaqa 1aad:

- Waa in la sajiilaa (waxey yeelanaysaa tabelaha sajiilaada).
- Waxaa la ogolyahay in lagu wado ugu badnaan 45 km saacadii.
- Laguma wadi karo jidadka baaskiilka u gaarka ah.
- Waa iney ku jirtaa caymiska gaadiidka.

Mootada dabaqa 2 aad:

- Looma baahna in la sajiilo.
- Waxaa la ogolyahay in lagu wado ugu badnaan 25 km saacadii.
- Waa lagu wadi karaa jidadka baaskiilka u gaarka ah.
- Waa iney ku jirtaa caymiska gaadiidka.

Mooto Iswiidhish duug ah oo lagu wadi karo ugu badnaan 30 km saacaddii waxaa loo arkaa iney tahay mootada dabaqa 2 aad.



Waxyaabo muhiim ah oo in lagu fekero mudan:

Warqadda wadista gaadiidka iyo tan caddeynta wadista labaduba waa lagaaga noqon karaa haddii aad sharciga jebiso. Kalanoqoshada waxey kuu sababi kartaa mushaakil nolohaada dambe marka aad damacdo inaad qaadato warqadda wadista gaadiidka ee gawaarida qaaska ah (personbil).

Laguuma ogola inaad sameyso imtixaanka imtixaanka aqoonta aragtida (kunsapsprov) ka hor intaadan gaarin da'da 15. Laakiinse waxaad sii bilaabi kartaa waxbarashada waqti ka horeysa. Tababarashada waditaanka wuxuu dhici karaa marka aad gaarto da'da 14 sanno iyo 9bilood. Ku tababarashada gaarka ah ee mootada lama ogola.

Xirfad ama aqoon hore waa ansax

Warqad caddeynta ee mar hore la bixiyey waa ansax wixii ka dambeeya kowda Oktoober 2009. warqaddan hore ee qadiimka ah waxaa lagu bedelayaa warqadda wadista gaadiidka ee waafaqsan AM. Isu bedelidda waxey dhaceysaa ugu dambeyn gudaha sanadka 2012. Dadka da'doodu buuxisay 15 sanno ka hor kowda oktoobar 2009 waxaa ayagoo sii wadan karaan waditaanka mootada dabaqa 2aad warqad caddeyn la'aan.

Macluumaad dheeraad ah:

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan warqadda wadista gaadiidka iyo warqadda caddeynta wadista waxaa laga heli karaa rugta internetka ee warqadda wadista gaadiidka. Hoygaa markasta waxaa lagu cusbooneysiisaa macluumaad casiyaysan oo ku saabsan su'aalaha warqadda wadista gaadiidka.

www.korkortsportalen.se

Waxaad kaloo kala xiriiri kartaa heyadda gaadiidka qeybtiisa macaamiisha oo aad ka wareysan karto wixii suuqo ku saabsan warqadda wadista gaadiidka adigoo diraya telefoonka lambar-kiisu yahay 0771-25 60 70.